## 5-108 Warbaahinta Baraha Bulshada

(12/15/09) (05/24/13) (09/20/21) (09/26/22)

### I. Ujeedo

In la aasaaso siyaasad ku saabsan isticmaalka shaqaalaha ee baraha bulshada.

### II. Qeexitaanno

**Nuxurka**: Qoraal kasta, qoraal, waxyaabo, dukumeenti, sawiro, sawir kumbiyuutareed, muuqaallo, lifaaqyo, ama macluumaad kale oo la sameeyay, la soo dhajiyay, la qaybiyay, ama lagu gudbiyay baraha bulshada

**Barta Warbaahinta Bulshada**: Waa goob internet ama barnaamij ay isticmaalayaashu ku abuuraan oo ku wadaagaan xog kana qayb qaataan bulshooyinka dhanka internet ka ah iyo wada sheekaysiyo, qaab bog oo kale ah, madal,koonto, koox ama joogitaan kale.  Kuwaas waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, baloogyada, golayaasha, goobaha lagu sheekeysto, Facebook, Twitter, Instagram, Nextdoor, LinkedIn, Reddit, iyo YouTube.  Siyaasaddan waxaa ku jira goobo cusub oo shabakadaha ku salaysan oo guud ahaan loo tixgeliyo warbaahinta bulshada ama in badan oo ka mid ah hawlo la mid ah kuwa liiska ku jira.

**Xogta Dahsoon ee Warbaahinta Bulshada:** Barta bulshada ee uu sameeyay oo uu ilaaliyo shaqaale MPD ah, laakiin magac la isticmaalaha aanan la xidhiidhin shaqaalaha MPD da, ujeedaduna tahay baadhista fal dambiyeedka.

### III. Siyaasadda

MPD waxa ku waajib ah inay ilaaliso sumcada hay’adda iyo shaqaalaheeda, iyo sidoo kale inay ka ilaaliso masuuliyada iyo khatarta sharci ee iman karta. Sidaa darteed, shaqaalaha waxaa lagula talinayaa kuwan soo socda:

**A.** Shaqaaluhu waa inay muujiyaan taxaddar iyo go'aan wanaagsan marka ay ku howlan yihiin baraha bulshada. Shaqaaluhu waa inay ogaadaan in waxyaabaha ku jira barahan bulshada lagu soo dacweeyo oo loo isticmaalo dacwadaha dembiyada iyo kuwa madaniga ah si xilka loo xukumo markhaatiga shaqaalaha.

**A.** Marka ay ku howlan yihiin baraha bulshada, shaqaaluhu waxa ay hoos imanayaan dhammaan siyaasadaha magaalada Minneapolis ("City") ee khuseeya, siyaasada MPD, iyo sharciyada maxaliga ah, gobolka, iyo federaalka ee ku saabsan macluumaadka dadwaynaha ee xidhiga baadhitaanada, iyo xogta shaqaalaha.

**B.** Siyaasadani waxay kabaysaa Siyaasada Isgaadhsiinta Elektarooniga ah ee Magaalada iyo Siyaasada Warbaahinta Bulshada.

## IV. Habka/Xeerarka

### A. Shuruudaha

Ku guuldareysiga u hoggaansanaanta kuwan soo socda waxay keeni kartaa dhaqan canaan, ilaa iyo ay ku jirto joojinta:

1. Siyaasaddan MPD da ee baraha bulshada.

2. Shuruudaha Siyaasadda warbaahinta bulshada ee magaalada iyo habraaceeda.

3. Qodobbada Nidaamka Warbaahinta Bulshada ee Magaalada ee la xiriira isticmaalka shakhsi ahaaneed ee baraha bulshada.

   Tan waxa ku jira, laakiin aan ku xaddidnayn, qodobbada soo socda:

   a. Qodobka 2aad

      Shaqaaluhu waa inaysan u isticmaalin Baraha Bulshada ee gaarka ah inay ka soo baxaan nuxurka qaab isgaarsiineed oo rasmi ah, inay ku hadlaan magaca Magaalada, si ay u muujiyaan inay matalaan danaha Magaalada, ama qaab loo arki karo inay tahay isgaarsiinta rasmiga ah ee Magaalada. Had iyo jeer ka fiirso sida wax loo tarjumi karo ama loo fahmi karo ka hor intaanad xog soo dhigin.

   b. Qodobka 3aad

      Magaaladu waxa ay filaysaa in shaqaaluhu noqdaan kuwa run sheeg ah, edeb leh, oo ixtiraama kormeerayaasha, dadka ay wada shaqeeyaan, dadka magaalada deggan, macaamiisha, iyo dadka kale ama hay'adaha xidhiidhka la leh ama la ganacsada Magaalada. Marka shaqaalaha loo aqoonsan karo inuu yahay qof u shaqeeya Magaalada, waa inaysan ku lug yeelan magac-sheegid ama weerar shakhsiyeed ama dabeecad kale oo caynkaas ah haddii dhaqanku uu si xun u saameynayo shaqadooda ama goobta shaqada ee magaalada. Qaybtan iyo xaddidaadeedu waxay khuseeyaan marka ficilka shaqaaluhu ay si xun u saamayso shaqadooda, waajibaadkooda shaqo ama awooddooda inay ku shaqeeyaan booskooda ama abuuraan jawi shaqo oo colaadeed.

   c. Qodobka 7aad

      Haddii shaqaaluhu doorto inuu isku caddeeyo inuu yahay qof magaca magaalada ugu shaqeeyo Baraha Bulshada ee gaarka ah ama Baraha Bulshada ee aan ahayn Baraha Bulshada ee ay magaaladu taageerto, soona bandhigo ra'yi shakhsiyeed oo ku saabsan arrin la xiriirta. arrimaha magaalada, afeef la mid ah kuwa soo socda waa in la isticmaalo:

"Kuwani waa fikirkayga, mana metelo kan magaalada Minneapolis."

d. Qodobka 9aad

i. Waxaa jiri kara waqtiyo isticmaalka shakhsi ahaaneed ee baraha Warbaahinta Bulshada ee aan ahayn Baraha Warbaahinta Bulshada ee ay magaaladu taageerto (xitaa haddii ay shaqada ka baxsan tahay ama ay isticmaalayaan qalabkooda) ay saameyn karaan ama saameyn ku yeelan karaan goobta shaqada oo ay noqon karaan asaaska tababarka ama anshaxa.

Tusaalooyinka xaaladaha ay tani ku dhici karto waxaa ka mid ah, laakiin aanan koobna:

- Cagajuglaynta internetka, dabagalka ama dhibaataynta.
- Ka qaybqaadashada anshax-xumo, nacayb.
- Marka hab-dhaqanka Baraha Bulshada ee gaarka ah loo arki karo inay khilaafsan tahay himilada, qiyamka, ama hoos u dhigidda kalsoonida dadweynaha ee magaalada ama waaxdeeda.
- Siideynta xogta magaalada oo aan ahayn mid guud.
- Hawlaha aan sharciga ahayn.
- Isticmaalka aan habboonayn ee magaca magaalada, astaanta, bogga internetka ee magaalada, ama jagada uu hayo ama darajada shaqaalaha ama qof adeeg u qabana magaalada.
- Isticmaalka qalabka ay magaaladu leedahay ama wakhtiga magaalada wax ka badan isticmaalka shakhsi ahaaneed ee marmarka qaarkood ee Baraha Bulshada ee aan ahayn Baraha Bulshada ee Magaaladu Taageerto, taas oo carqaladaynaysa kartida qofku u leeyahay inuu shaqadiisa guto.
- Ku xad-gudbida sharciga, hadday tahay federaal, gobol, ama deegaan, ama ku xadgudubka siyaasadda Magaalada.

ii. Xaalad kasta waxaa loo qiimeyn doonaa goonideeda sababtoo ah sharciyada goobtan ayaa horumaraya.

**B. Isticmaalka magaalada ay taageerto ee la oggol yahay**

Qaar ka mid ah shaqaalaha MPD ayaa laga yaabaa in loo ogolaado inay u isticmaalaan baraha bulshada xiriirka dadweynaha ee MPD du ay ansixisay iyo baarista rasmiga ah ama ujeedooyinka la xiriira shaqada. Isticmaalka noocaas ah waa in uu oggolaadaa Maamulka Booliiska.

**C. Isticmaalka qarsoodiga ah ee baraha bulshada**

MPD waxay aqoonsan tahay in adeegsiga baraha bulshada ee qarsoon ay noqon karto aalad waxtar u leh baaritaanka fal dambiyeedka.

1. Diiwaan gellinta Koontada shaqsiga ah

   a. Dhammaan baraha bulshada ee qarsoon waa in laga diiwaan geliyo Taliyaha kormeeraya Xarunta Macluumaadka Istaraatiijiga ah (SIC). Macluumaadka la bixiyay waa in ay ku jiraan:

      - Magaca & ciwaanka mareegta ee baraha bulshada
      - Magaca isticmaalaha iyo shaashadda ee astaanta warbaahinta bulshada ee qarsoon, iyo
      - Shaqaalaha MPD ee masuulka ka ah ilaalinta xogta qarsoon ee warbaahinta bulshada.

   b. Taliyaha ama cidda ay u xilsaaran tahay waa in ay sameeyaan xisaab xidhka sannadlaha ah si loo hubiyo in koontada qarsoon ay weli shaqaynayso.

   c. Marka xogta sirta ah ee baraha bulshada aan loo baahnayn, waa in la baabi'iyaa ama laga tirtiraa baraha bulshada, illaa inta ay oggol tahay baraha bulshada, waa in la ogeysiiyaa Guddoomiyaha.

2. Masuuliyadda shaqaalaha

   a. Shaqaalaha MPD da ee u diiwaan gashan sidii ilaaliye astaanta warbaahinta bulshada ee qarsoon ayaa mas'uul ka ah dhammaan waxyaabaha lagu soo bandhigo boggaas.

   a. Shaqaaluhu waa inay ilaashadaan muuqaalkooda qarsoon ee warbaahinta bulshada, mana la wadaagi karaan macluumaadka gelitaanka shaqaalaha kale, marka laga reebo:

      i. Shaqaaluhu waa inuu bixiyaa erayga sirta ah boggooda u diiwaan gashan marka uu ka codsado Taliyaha ama cidda ay u xilsaaran tahay ama ujeedooyinka isla-xisaabtanka.

3. In aan la dhiitsgellin rabshado ama fal dambiyeed

   Shaqaalaha MPD waa inaysan soo dhiggin wax macluumaad ah oo ku saabsan bog warbaahin bulsho ee qarsoon kaas oo dhiirragelliya rabshadaha ama fal dambiyeedka.